



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 7, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Nidaamka La talinta oo joojinaya adeegyada ka jira Oregon

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa dhawaan la soo ogeysiiyay in Mentor Network ay adeegyada ka jira Oregon joojin doonto Ogoosto 31, 2021. ODDS iyo Mentor Oregon ayaa si wadajir ah u wada shaqeynaya si ay u xaqiijiyaan in carqalada ugu yari ku timaado adeegyada iyo taageerooyinka la siiyo dadka dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD).

Mentor waa adeeg bixiye weyn oo sanado badan ka soo jiray Oregon oo waqtigan la joogana adeegyada hay'adeed, guryaha koox ahaanta loo degan yahay, nolosha la taageero iyo shaqo siiya in ka badan 1,300 oo qof.

Waxaanu ka mahad celinaynaa daneynta wax la daneynayo ee aanu ka helnay adeeg bixiyayaasha raba xaqiijinta in dadka uu taageero Mentor Oregon ay sii wadan doonaan helitaanka adeegyada. Waqtigan la joogo, waxaan hay'adaha wax daneynaya ka codsanaynaa in ay si toos ah ula xiriiraan Mentor Oregon si loo ogaado heshiisyada ganacsi ee suurtagalka ah ee loogu talagalay adeegyada deganaanshaha iyo shaqada.

ODDS waxay ku hawlan tahay sidii loo aqoonsan lahaa Hay'ado cusub iyo kuwo hadda jira si loo sii wado bixinta adeegyadani muhiimka ah ee ka jira degaanka Portland metro iyo degaanka Mid-Willamette Valley. Abuurista in la helo hay'adaha adeegyada oo dheeraad ah oo ka jira degaanadaasi ayaa dhici doonta bilaha soo socda iyada oo macluumaadka la isla

wadaagi doono marka uu noqdo mid la heli karo. Haddii aad horeba noogala soo xiriirtay fursadani, fadlan sug macluumaad dheeraad ah. Hadafkeenu waa in kuwa loo adeego iyada oo la adeegsanayo Hay'adaha Mentor Oregon ay awoodi doonaan in ay doortaan adeegyada maamulka kiiska oo ka socda hay'ada maamulka kiiska oo kale, oo ay ku jirto Hay'ad ama Barnaamijka Naafanimada Korrinka ee Bulshada (CDDP).

Waad mahadsan tihiin dhammaan daryeel bixiyayaasha iyo bulshada I/DD in aad isku timaadaan si loo xaqiijiyo in dadku heli karaan adeegyo iyo taageerooyin tayo leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.